

Fahanka Xidhiidhka iyo Waxbarashada Caafimaadka ee dugsiiga hoose ee ilmahaaga: tilmaamaha waalidka

Waxaanu doonaynaa in dhammaan carruurta ay ku korto caafimaad, badbaado, oo ay awoodaan inay maamulaan caqabadaha iyo fursadaha Ingiriiska ee casriga ah. Waa taas sababta, laba bilaabo Sebteember 2020, dhammaan caruurta da'da dugsiiga loogu dhigayo Xidhiidhka waxbarashada iyo Caafimaadka.

Maadooyinka waxaa loo nashqadeeyay in ay carruurta u diyaariso aqoonta xidhiidhka si ay u gaadhaan go'aan wax ku ool ah oo ku saabsan badqabkooda, caafimaadkooda iyo xidhiidhkooda sidoo kale diyaar u ahaanshaha nololaha qofka wayn uu guul ah. Caalamka dhammaan dadka dhalinyarada wuu ka duwan yahay muuqaalkii uu lagaa 20 sano kadib markii manhajkan waxa laga badalay - oo caqabadahaahi waxay macluumaadka keenayaa qarniga 21aad, markaa tani waxay la xidhiidhaa ilmahaaga.

Dugsiiga ilmahaagu waxa uu u bixinayaa casharada qaab waafaqsan da'da iyo koriinka munaasabka ah oo waxaa lagu xisaabtamayaa xasaasiyada baahiyaha iyo diinta arydooda.

Xidhiidhka waxbarashada

Xidhiidhka waxbarashada waxa uu meel dhigayaa sayska dhismaha loogu baahan yahay xidhiidh wanaagsan oo badbaado ah, oo ay ku jiraan qoyska, asxaabta iyo online ahaan (khadka).

Ilmahaaga waxaa la barayaa waxaa xidhiidhku yahay, waxa asxaabtinimadu tahay, waxa qoysku ka dhigan yahay iyo cida ka caawin karta. Qaabka da'da ku haboon, dugsiigaagu waxa uu ka hadli doonaa sida la isku dhaqmayo naxariis, la isku tix galinayo oo la isku qadarinayo.

Dhamaadka dugsiiga hoose, ardayda waxaa loo dhigay:

- qoysaska iyo dadka aniga u daryeela
- daryeelista asaxiibtinimada
- xidhiidhka qadarinta leh
- xidhiidhka khadka ah
- badbaado qab

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heleysaa adiga ka baadhaya **'relationships and health education (waxbarashada xidhiidhada iyo caafimadka)'** GOV.UK.

Waxbarashada Caafimadka

Waxbarashada Caafimadka waxaa loogu talo galay in ilmahaaga lasiiyo macluumaadka uu ugu baahan yahay si uu go'aan wanaagsan u gaadho oo ku saabsan caafimaadkiisa iyo badqabkiisa, in la aqoonsado mushkiladaha lafteeda iyo waxyaabaha kale, si loo doonto taageero ilaa inta hore ee macquulka ah marka ay timaado.



Dhamaadka dugsiiga hoose, ardayda waxaa loo dhigay:

- fayo-qabka dhimirka
- badbaadada iyo waxyeelada internetka
- caafimaadka jidhka iyo jimicsiga
- wax cunista caafimaadka qabta
- macluumaadka iyo khatarta ku duugan mukhaadaraadka, khamrada iyo tobaakada
- caafimaadka iyo kahortaga
- kaalmada caafimaadka ee kowaad ee aas aasiga ah
- isbeddelka jidhka dhowr iyo toban jirada ah

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heleysaa adiga ka baadhaya **'relationships and health education (waxbarashada xidhiidhada iyo caafimadka)'** GOV.UK.

Xuquuqdaada waalid ahaan

Casharka muhiimka ah ee ilmahaaga aad uga dhigayso xidhiidhka caafimaadka qaba, waa inaad naftaada ilaalisaa oo aad bad qabtaa, taas oo lagu maamuusayo oo lagu qiimaynayo manhajkan cusub. Wax ka dhigida dugsigan waxa ay xoojinaysaa oo ay dheeraad siinaysaa casharada aad ilmahaaga barayso inta uu korayo.

Dugsiga ilmahaaga waxaa looga baahan yahay inuu kaala tashado marka uu diyaarinayo ee uu dib u cusboonaysiin ku samaynayo xeererka Xidhiidhka waxbarashada. Xeererkan waa in lagu baahiyaa online ahaan oo ay cid walbaaba heli kartaa iyada oo bilaash ah.

Waxaad ka dhiiban kartaa fikirkaaga, oo taasina waxay ka caawinaysaa dugsiga ilmahaaga inuu go'aansado sida iyo goorta uu ka hadli doono macluumaadkan tilmaamaha. Waxay ka caawin kartaa inay go'aamiyaan haddii ay dhigayaan macluumaad dheeraad ah oo aan waajib ahayn. Dugsiyadu waxaa looga baahan yahay inay xaqiijiyaan in waxay dhigayaan ay da'da munaasab ku tahay iyo diinta dardayda.

Dugsiyada qaar waxay bilaabi doonaan dhigista laba bilaabo Sebteember 2019 - haddii aad doonayso inaad macluumaad dheeraad ah ka ogaato, waxaad kala hadashaa dugsiga ilmahaaga wixii ku saabsan waxa u qorshaysan inay dhigaan.



Xuquuqda inaad kala baxdo ilmahaaga

Kalama bixi kartid ilmahaaga Xidhiidhka waxbarashada maadaama ay muhiim u tahay dhammaan caruurta inay helaan macluumaadkan, oo ay bartaan mawduucyada lagaga hadlayo sida asxaabtinimada iyo sida uu badbaado u qabayo.

Dugsigaaga hoose ee ilmahaagu waxa uu dooran karaa inuu dhigo Waxbarashada Galmada. Haddii aad doonayso inaad wax badan ka ogaato tan, waxaanu kugula talinaynaa in aad kala hadasho dugsiga waxa loo dhigi doono iyo goorta. Haddii aanad doonaynin in qaybo ama dhammaan casharada Waxbarashada Galmada inaanu ka qayb gelin, waxaad dalban kartaa in laga saaro. Dugsiga hoose, heedh maastarka macalinka ah waa in uu dalabkaas fuliyaa.

Manhajka sayniska ee dhammaan dugsiyada waa in lagu hayaa oo ay ku jiraan hormarka bilaa aadanka, oo ay ku jiraan taranka, kaas oo aan xuquuq loo lahayn in laga saaro.

